

Dugsiga Harrison Park Waxay Soo Dhaweeyeen Summada Kooxda

Isu soo bixii ugu horreeyey Dugsiga Dhexe ee Harrison Park haddii uu yahay calaamad, markaa dugsigu wuxuu leeyahay mustaqbal soo iftiimaya oo ay ka ladhan yihiin qoob ka ciyaar, kaftanka bisada, heesaha kala duwan ee ay ka midka yihiin mad beats, big feelings, iyo, wait for it...panthers.

Dugsiga Harrison Park oo xilligani dayrta loo bedelay inuu noqdo dugsi dhexe, ayaa dhawaan wuxuu qabtay sidii cod loogu qaadi lahaa dhammaan dugsiga summadii uu yeelan lahaa ciyaartoygoodu. Sida ay sheegtay Maamulaha Dugsiga ee Leah Dickey, bilahan ugu horreeyey intiii dugsigu ahaa dugsi dhexe waxay muhiim u ahayd ardayda Harrison Park oo isku dayey inay la qabsadaa xiisaha cusub iyaga abuuraya aqoonsiga dugsi ahaan iyo bulshaba. Xulashada summada ciyaartoyga dugsiga waxay ahayd qeyb muhiim ka ah safarkaas la soo galay.

“Waxaan aad ula yaabay sida habsamida ah safarkaasi dheer ee aan soo u marnay, “sidaa waxaa tidhi Dickey. “Ardaydeenu run ahaantii waxay bilaabeen inay aqbalaan kala duwanaanshaha midba midka kale ka duwan yahay iyo inay noqdaan bulsho dugsi oo adag. Farxad weyn bay ahayd inaad aragto caruurta oo ka soo qeybgaleysa waayo-aragnimada dhammeystiran ee dugsiga dhexe iyo inay ku sugnaayeen barxada dhulka dugsiga iyaga oo abuuraya caadooyinkii iyo jawi taban oo qof walba ixtiraamayo qofka kale.”

Dr. Daniel Carpenter waa khabiirka dugsiga Harrison Park dhinaca horumarinta dhaqanka ardayda iyo macallimiinta iyada oo mas'uuliyadiisa ay ka mid tahay kor u qaadida ardayda sidii ay u noqon lahaayeen hoggaamiyaasha dugsiga. Iyada oo ay sababtu tahay, wuxuu sanadkani markii ugu horeysay dugsiga ka bilaabay barnaamij la yira Meeshii Qof Waliba Lahaa. Barnaamiju wuxuu lammaaneeyey ardayda fasalada sideedaad iyo kuwa fasalada lixaad muddo sanad ah sidii ay u baran lahaayeen hoggaaminta. Waxay sidoo kale martigaliyaan madadaalo maalmaha Jimcayaasha, inta lagu gudo jiro barnaamijka ardayda waxay u dabaaldegaan saaxibadooda shaqada fiican soo qabtay todobaadkii iyaga oo ku weyneynaya muusiko, salool, iyo cabitaan marka laga la kala tegayo. Fikradooda ayey ahayd in kulankii dugsiga loo bedelay isu soo bax xamaasadi ku dheehan tahay.

Dr. Carpenter waxa uu tallo ka siiyey markii ay ardaydu qorsheynayeen isu soo baxoodii ugu horeeyey abid ee dugsiga dhexe, laakiin, kuwaasi oo run ka dhigaya himilooyinkooda barnaamijka WEB, fasalada sideedaad xaqiqidii iyaga ayaa lahaa hoggaaminta.

“Waxaanu qorsheyneynay isu soo baxa muddo dhan labo bilood, sidaa waxaa yidhi Dr. Carpenter. “Isu soo baxayaga xilliga dayrta waxaa go'aamisay guddi iyaga oo leh labo MCs. Wuxaan leenahay arday soo bandhigaya siday u soo bandhigayaan isu soo baxa iyo Hoggaamiyaasha barnaamijka WEB xukumayey, kana soo bixiyaan jawaab celin, iyo inay ka dib u soo bandhigaan ardayda da'dooda ah.”

Iyo bandhiga ay soo bandhigeen. Kulanka ay ardaydu maamulayaan wuxuu ahaa mid aad kuu farax galinaya iyada oo aad dareemeyso hibada ka muuqatay oo ay ka mid ahaayeen in la baro xubnaha cusub ee dhawaan loo doortay golaha ardayda dugsiga Harrison Park iyo madaxweynaha ardayda.

Bandhig kasta waxaa daadihinayey Maamule Dickey iyada oo masraxa tagaysay sidii ay ardayda ugu sheegi lahayd inay ogaadaan waxa ay summadu ayna noqon doonin.

“Summad ma aha masduulaaga!” ayey ku dhawaaqday, markii ay dhammaaneysay bandhiga heesaagii Michael Jackson iyo heestiisii “Thriller” taasi oo kooxda dugsi ay ku sameynayeen qoob ka ciyaar.

“Summadu ma aha shimbir baraf!” ayey tidhi, farxadaasi waxay istaagtay ka dib markii ay kooxda dugsiga iyo hobolada heesuhu ay u kaceen heesta “I Got a Feeling” ee ay qaadaan Black-Eyed Peas.

“Summadu ma aha ri’!” ayey tidhi, iyada oo ay daba socdaan Isaiah Hutton isaga oo soo bandhigaya muusikada Billie Eilish iyo Khalid “Lovely (Ku Soo Dhawaada Guriga).”

“Summadu ma aha phoenix!” ayey tidhi ka dib ardayda fasalka todobaad ee Itiel Orozco-Vargas iyada oo masraxa ku soo bandhigtay qoob ka ciyarka dhaqanka ee lagu maamuuso bisha Taariikhda Hisbaaniga.

Baashaal fara badan ka dib, ugu dambeiyntii Maamule Dickey waxay soo bandhigtay iyada oo daaha ka qaaday summada. Markii ay ku wargalisay qaylo ayey isla oogsadeen ardaydii goobta ku sugneyd iyaga oo isweydaarsanayey sumadaas, dhammaan hoolkii qaylo ayaa dadkii maqalkii ka tagay. Ardaydu waxay ku muujiyeen dabaaldegaasi iyaga oo kor u boodboodaya, laabta isgalinaya iyo gacan qaadka. Iyada oo tiro yari ay xitaa fuuleen saqafka dugsiga.

Haddaba waxaa la gaaray waqtigii la tagi lahaa. Boqolaal cusub oo macmacaan qolka shirarka iyada oo maalin qurux badan oo bisha Oktoobar ahayd.